

ABABINTA TOOSAN

Tala kugu hagaysa barbaarinta san ee ilmaha
(Helpful guidance for effective child rearing)

Cabdiqani Xasan Muxumed

ARAGTIDA GUUD EE TARBIYADDA

“Laba-lugoodle hooyadiis ayaa la xulaa, afar-lugoodlana aabbihis” – Murti Soomaaliyeed.

Ababintu waa in ilmaha yaraanta iyo korriimada hore ku bartaan sansaanta, habka iyo ku dayashada waana ka ballaaran tahay korinta. Jean-jecques Rousseau oo ahaa filasoof reer Switzerland ah waxa uu ku micneeyay barbaarintu in ay tahay korin iyo leylin la leyliyo dareenka, fikirka iyo damiirka (Rousseau, 1762). Quraankana waxa uu Eebbe ku xusay erayga "rabbayaanii" oo ah barbaarin. Sidaa oo kale waa kii Fircoon ku lahaa Nebi Muuse cs: "Miyaanan ku barbaarin". Ma aanu dhihin miyaanan ku korin.

In la tarbiyeeyo ilmaha waa xil saaran waalidiinta. Haddii ay gutaan xilkaasna Alle wuu ka abaalmarinayaa, haddii ay dayacaanna waa la weydiin doonaa maalinta qiyaamaha. Marka ilmaha si wanaagsan loo barbaariyo waxa ay noqdaan kuwa ay ka ifto fitradii lagu abuuray, isla markaana samaantaas u gudbiya bulshawaynta iyo weliba tarankooda dambe. Waxa ayna anfacaan inta waalidiintu nool yihiin iyo geerida ka dib. Faa'iidooyinka tarbiyadda waxa ka mid ah in bulshadu hagaagto oo la helo ummad dhan walba ka horumarsan.

Waalid kasta ee xilkas ahi waxa uu ku dadaalaa in uu carruurtiisa u gudbiyo furayaasha anshaxa iyo nolosha wanaagsan, sida.-

- Diinta: In ay ka dhaxlaan diinta iyo caqiidada.

- Dhaqanka: In ay ka dhaxlaan hiddaha iyo dhaqanka.
- Afka: In ay ka dhaxlaan afka iyo aqoonta la xiriirta.
- Caadada: In ay ka dhaxlaan caadooyinka suubban

Arrimahaas kor ku xusan si loo gaaro waxa loo baahan yahay in si wanaagsan loo garto jidka loo mari karo. Waxaa laga yaabaa marka aad waalidiinta qaar wax ka weyddiiso arrinka carruurtooda in ay kuugu jawaabaan: "Guri wanaagsan ayaan u dhisay, cunta fiican ayaan siiyaa, dhar qaali ah ayaan u soo iibiyaa, aad bay u wanaagsan yihiin, waxba kama maqna" iwm. Halkaas waxaa nooga muuqda in aragtidii barbaarintu ay ku soo ururtay hunguri, hu' iyo hoy qurxoon oo qura. Balse arrimahaas goorma ayey noqdeen tarbiyo? Carruur aan laga warhayn hab-dhaqankooda oo aan la barin sidii ay ku gaari lahaayeen adduunkooda iyo aakhiradooda toona, in la yiraahdo way wanaagsan yihiin waa fahandarro iyo xilkasnimo la'aan.

Dr Maxamed Siciid Mursi waxa uu buuggiisa "*fannu tarbiyatul awlaad fil-islam*" ku soo bandhigay toban arrin oo lagama-maarmaan u ah barbaarinta ubadka. Waxa ayna kala yihiin:

- *Tarbiyadda Siyaasadda*
- *Tarbiyadda Bulsho la dhaqanka*
- *Tarbiyadda Akhlaaqda*
- *Tarbiyadda Dhaqaalaha*
- *Tarbiyadda Iimaanka*
- *Tarbiyadda Tiknoolajiyadda*
- *Tarbiyadda Guurka*
- *Tarbiyadda Caafimaadka Nafta*

- *Tarbiyadda Caafimaadka jirka iyo*
- *Tarbiyadda Ilbaxnimada*

Tarbiyadda Siyaasadda

Marka aad aragto cinwaankan waxaa laga yaabaa in aad is tiraahdo oo maxaa ilmahana siyaasadda soo geliyay dadkii waaweynaa ayaaba wax ka keeni waayaye. Si ay u fududaato su'aasha la iska weydiin karo arrintaas, adduunyadu dhammaanteed waa wada siyaasad. Wiil yar oo ka dhashay reer jillaabato ah ayaa aabbihiis weydiiyay su'aal ah: *“aabbow horta aakhiro kalluun ma laga dabtaa”*? Odaygii oo doonaya in uu wiilkiisa baro in aanu qof wanaagsani bilaash meel u fadhin ayaa yiri: *“Maandhe, kolley ninna marag la'aan meel uma fadhiyo”*.

Siyaasadda la doonayo in la baro carruurta waa in ay aragti san ka helaan siyaasadda, lana fahansiiyo in ay horumarka iyo guusha ummaddu ku xiran tahay dawlad wanaagga. Ujeeddadu ma aha in carruurta la baro burburinta dawladnimada iyo in la aflagaadeeyo madaxda qaranka, laakiin waa.-

- In la baro in Nebi Muxammad **scws** uu ahaa hoggaamiye caadil ah oo Alle la soo diray naxariis iyo in bulshada la nidaamiyo oo la dhiso, si ay adduunkooda iyo aakhiradoodaba u guuleystaan.